



RAPIDRIDE



Mulkiileyaasha guryaha iyo mashaariicda Metro

Mashaariicda RapidRide waxay socdaan muddo dheer ayagoo mara sadex waji — qorsheyn, naqshad iyo dhisme. Ogoow sida aan ula shaqeyno mulkiileyaasha guryaha ay saamayntu soo gaari karto inta lagu jiro waji kasta oo mashruuca kamid ah iyo waxa aad filan karto ee quseeya gurigaaga.



QORSHAYNTA



NAQSHADA



DHISMAHA

Su'aalo ma qabtaa?
transitproperty@kingcounty.gov
kingcounty.gov/rapidride



**King County
METRO**

Moving forward together



Qorshaynta

? Sidee ayuu wajiga qorsheyntu u saamayn karaa gurigayga?

Marka ay Metro qorsheynto mashruuc, waxaad arki kartaa shaqaalaha ama qangaraasleyaasha Metro oo jooga goobaha dadwaynaha, oo samaynaaya xog uruurin, qaadaaya sawiro, ama mararka qaar samaynaaya tijaabooyinka ciida ama biyaha dhulka. Waxaan uruurinaa xog inta lagu jiro wajigaan si ay nooga caawiso inaan faahfaahino abuurka iyo naqshada mashruuca, anagoo raadinayna meelaha ay maraan tuubooyinka biyaha korontada iyo gaaska, meelaha fiilooyinka guriga iyo aasaasyadu maraan, iyo qaabka dhulku yahay. Qaar kamid ah shaqooyinka waxaa kamid ah kormeerada indho-indhaynta ah ee guriga, qaadista sawirada guriga iyo dhismeyyaasha, samaynta cabiro, eegista diiwaannada dadwaynaha, iyo abuurista jaantuska sawirka dhismaha. Inta badan shaqada inta lagu jiro wajigaan ayaa lagu samayn doonaa dhulka dadwaynaha, wadooyinka dadwaynaha, iyo goobaha ruqsada ka haysta magaaladaada marka loo baahdo.

Haddii kooxdaadu go'aamiso in aan u baahan nahay gelitaanka gurigaaga si aan u uruurino qaar kamid ah xogtaan waxaan u diri doonaa mulkiilaha guriga warqad sharxaysa sababta aan u doonayno inaan galno gurigaaga aana kaaga codsanayno inaad saxiixdo Right of Entry (ROE, Xaqa Gelitaanka). ROE waa heshiis fudud oo labadaba mulkiilaha guriga iyo Metro ay saxiixayaan, taasoo u ogolaanaysa kooxdeena inay galaan gurigaaga sababo gaar ah awgood oo aan kuu sheegnay inaan u galayno (tusaale, sawiro, ama cabirista geedaha, ama qaadista sanballada ciida). Waxaan kala shaqeynaa mulkiilaha guriga go'aminta wakhtiga ugu haboon ee gelitaanka iyo sida aan u yareyn karno carqalada mulkiilaha guriga iyo dadka kireysteyaasha ah ama macaamiisha. Haddii shaqadeenu wax carqalad ah abuurto (tusaale, qodista ciida), waxaan dhismaha ku celinaa sidii ay ahayd.

? Goorma ayaan ogaanayaa haddii gurigayga loogu baahan yahay mashruuca?

Inta mashruucu ku jiro wajiga qorsheynta iyo injineeriyada hore, kooxda ayaa abuuraysa oo cusbooneysiinaysa liiska guryaha aan u baahan karno in mashruucu saameeyo. Kooxda mashruuca ayaan la xiriiri doonin mulkiileyaasha guryaha si ay uga codsadaan adeegsiga dhulkooda ilaa inaan ognahay maahee si dhab ah in aan u baahan nahay dhulkaan. Shaqooyinka qorsheynta awgood sida shaqada goobta ee kor lagu sheegay, taasoo la samaynaayo biloowga hore ee mashruuca. Laakiin si loogu adeegsado dhismaha ama saamaynada abadiyanka ah, kooxda ayaa caadiyan biloowda aqoonsiga saamaynadaas marka naqshadu gaarto heerka 60%.

? Maxaa dhacaaya haddii Metro u aqoonsado dhulkayga meel saamayn soo gaari karto?

Metro waxay raacdaa xeerar gaar ah iyo habraacyo qeexaaya sida aan ula shaqeyn doono mulkiileyaasha guryaha inta hawshaan socoto oo dhan. Metro waxay raacdaa tilmaamaha federaalka markasta oo ay dhul u iibsanaayo mashaariicda, gaar ahaana Uniform Relocation Assistance (Caawimaada Meel Kale u Guurista Mideysan) iyo Real Property Acquisition Policies Act (Sharciga Xeerarka Iibsiga Dhulka Rasmiga ah), iyo sidoo kale sharciga gobolka iyo Xeerarka King County. Xeerarka iyo shuruucda ayaa loo sameeyay xaqiijinta in mulkiileyaasha guryaha ee saamayntu ku dhacday iyo kireysteyaasha loola dhaqmo si cadaalad ah, aan ka shaqeyno yareynta saamaynada xun iyo caqabadaha ka dhasha mashruuca, iyo inaan joogteyno xiriirka wanaagsan ee dhammaan dhinacyada ay qusayso.

Mashaariicda RapidRide ayaa u saamayn kara guryaha qaabab kaladuwan. Saamaynada ayaa noqon kara kuwo ku meel gaar ah, saamaynto toos ah u yeelan kara guri gaar ah, sida marka gurigaaga loogu baahdo dhisida hormarinnada tubta saxda ah. Tusaale ahaan, haddii mashruuca ay qasab noqoto inu laga dhiso geeska lagu socdo ee horta gurigaaga, seedka gurigaaguna uu ka bilaambaayo dhabarka danbe ee marinka lagu socdo, waxaan kaa codsan karnaa inaan adeegsano dhawr fiid oo kamid ah fagaagaaga muddo wakhti ah si aan u dhigno uguna shubno shulka geeska lagu socdo. Waxaan xaqiijinaynaa in cawskaaga lagu cesho meeshiisa kadib marka aan shaqada dhameeyno. Agabka kale ee mashruucu saameeyo ayaa noqon kara kuwo abadiyan ah, sida marka geeska wadada uusan lahayn balac ku filan oo laga dhiso astaan cusub oo bas walina la ogol yahay ogolaanshaha sharcigan qasabka ah ee gelitaanka, sida ku cad Americans with Disabilities Act (Sharciga Ameerikaanka Naafada ah). Marka ay sidaan dhacdo, waxaan kaala hadli doonaa iibsashada qayb yar oo kamid ah dhulkaaga si aan u balaarino marina si aan u dhiso hormarinnada.

Haddii gurigaaga loo aqoonsado mid uu saamaynaayo mashruucu, midkood ujeedooyinka dhismaha ama kuwa mudada dheer ah, waxaad heli doontaa warqad ka imaanaysa King County ama la taliyaheeda xaqa wadada oo kuu sheegaysa kaana codsanaysa inaad la kulanto kooxdeena si aad ugala hadasho.



NAQSHADA

? Sidee ayuu wajiga naqshadu u saamayn karaa gurigayga?

Inta lagu jiro wajiga naqshada, Metro ayaa sii wadi doonta baaritaanka xaalada ciida biyaha dhulka hoostiisa, iyo shaqada kale ee qodotada dheer ee goobta sida xog uruurinnada iyo raadinta meelaha ay maraan tuubooyinka tasiilaadka guryaha. Marka laga hadlaayo wajiga qorsheynta, inta badan shaqadaan ayaa ka dhacaysa aaga dadka maro, laakiin haddii kooxdeenu u baahato inay gasho dhulkaaga waxaan kuu soo diri doonaa warqadda codsiga Xaqa Gelitaanka oo ikhtiyaari ah. Waxaan ka shaqeyn doonaa yareynta carqaladaha ku dhacaaya gurigaaga, kireysteyaalka kasta iyo dadka kale ee guriga dagan inta shaqadaan socoto' marka shaqada la dhameeyana, waxaan ku celin doonaa dhulka saamayntu ku dhacday sidii uu awal ahaa.

? Metro ayaa u aqoonsatay gurigayga inay iibsato. Maxaa dhacaya intaas kadib?

Marka Metro u aqoonsato in dhul gaar loo leeyahay saamayn kasoo gaari doonto mashruuca, waxaan qaadi doonaa dhawr talaabo.

- Waxaan u sheegaynaa kormeere ruqsad haysta inuu sawiro jaantuska muujinaaya aaga dhulka saamayntu ku dhacayso, iyo qeexitaanka dhanka sharciga.
- Waxaan shaqaaleysiin doonaa qiimeeye madax banaan si uu u qiimeeyo guriga. Qiimeeyaha ayaa kula soo xiriiri doona adiga, mulkiilaha guriga, kuuna yaboohi doona fursad aad uga qaybgalaysa qiimeynta guriga.
- Metro ayaa midkood dib u eegi doonta qiimeynta si iskeen ah, ama mararka qaar qoronaysa dib u eegaha qiimeynta ee madax banaan si loo xaqiijiyo in talaabooyinka saxda ah la raacay marka la qiimeynaayay gurigaaga iyo in fikirka qiimuhu sax yahay. Metro ayaa intaas kadib adeegsanaysa qiimeynta si ay u go'aamiso cadadka "magdhawga cadaalada ah," kaasoo ah qiimaha lacageed ee mulkiilaha gurigu xaq u leeyahay inuu ku badesho dhulka saamayntu ku dhacayso.
- Metro iyo wakiilkeeda la talinta ayaa kuu soo diraa yabooh qoraal ah oo ku aadan qiimaha gurigaaga kaana codsanaysa inaad la kulanto si aad ugala hadasho yabooha. Waxaad intaas kadib wakhti u heli doontaa tixgelinta iyo ka jawaabida yabooha.
- Yoolka Metro waa inay hesho dhammaan dhulalka loogu baahan yahay mashruuc kasta ayadoo ku helaya gorgortan lala samaynaayo mulkiilaha guriga, marka kadib marka ay kula kulantn, kula niqaashno, oo aa kula gorgortanno, ayaan soo gabo gabayn doonaa iibsiga guriga iyo bixinta qiimaha guriga.

? Waa maxay adeegyada aan rajayn karo haddii gurigayga saamayntu ku dhacdo?

Mashaariicda RapidRide, inta badan mashruuca Metro ayaa keliya saamaynaaya meelo yar oo kamid ah gurigaaga caadiyanna uma baahna inuu qaato dhammaan gurigaaga. Waxaad xaq u leedahay inaad u raacdo qiimeeyaha marka uu samaynaayo qiimeynta gurigaaga, Metro ayaana bixinaysa lacag dhan ilaa \$750.00 si aad u hesho yabooha iyo/ama dib u eegis uu u sameeyo khabiir – qiimeeyahaaga gaarka ah, tusaale ahaan, ama qareen.

Marar dhif ah, mashruuca Metro ayaa saamayn kara guri ilaa heer aan u baahanno inaan iibsano guriga oo dhan qofka dagana uu ka guuro. Mulkiileyaasha ama kireysteyaasha guryaha la dagan yahay ama ganacsiga ee ku barakici doona saamaynada Metro ee ku dhaca gurigaaga ayaa xaq u leh caawimaada guurista – tallo iyo caawimaad dhaqaale. Haddii Metro aaminsan tahay in lagugu baro kicin karo saamaynada mashruuceena ee ku dhacaaya gurigaaga, waan kuu sheegi doonaa waxaana kuu keeni doonaa tallo bixiyaha guurista oo xirfad u leh, kaasoo kaa caawin doona go'aaminta baahiyahaaga kuuna sharxaaya noocyada dheefaha lagu siin karo si lagu caawiyo. La taliyaha guurista ayaa sidoo kale kaa caawin doona helitaanka kaydada guryaha ama goobaha ganacsi ee aad u guuri karto kaana caawin doona gudbinta codsiyo kasta si aad u hesho dheefaha aad xaq u leedahay.



Dhismaha

? Sidee ayuu wajiga dhismuhu u saamayn karaa gurigayga?

Dhismaha wayn ayaa carqalad abuuri kara, waana taas sababta Metro ugu dedaalayso abuurista xaafad wanaagsan. Dhammaan inta wajiga dhismuhu socdo, waxaa jira shaqaalaha gaarka ah ee Fikir Uruurinta Bulshada oo diyaar u ah inay ka jawaabtaan su'aalaha xal u helaan baahiyaha, sidoo kalena ay kormeeraan adeegga laynka tooska ah ee dhismaha.

Mashruuc dhiseyaasha ayaa raacaaya shuruudaha caadiga ah marka ay ka shaqeynayaan xaafada iyo deegaanka, ayna ku jiraan:

- Joogtaynta goob shaqo oo badqab, nadaafad iyo amaan leh.
- Joogteynta marinnada guryaha iyo ganacsiga.
- Yareynta saamaynada qaylada iyo nalalka.
- Yareynta saamaynada baakinka ee ka imaanaaya qalabka iyo gaariyaasha dhismaha.

Metro ayaa sii wadi doonta hanaanka iibsashada ayadoo ku saleynaysa dhismeyaasha iyo marika loogu baahan yahay jadwalka dhismaha. Guriga loogu baahdo mashruuca ayaa lagu iibsan karaa heerar si loo daboolo jadwalka mashruuca. Metro ayaa la shaqeyn doonta mulkiileyaasha guryaha iyo kireysteyaasha inta dhismaha lagu jiro oo dhan si loo yareeyo saamaynada ku imaan kara gelitaanka dhismaha.



Su'aalo ma qabtaa?
transitproperty@kingcounty.gov
kingcounty.gov/rapidride

 King County
METRO
Moving forward together